DEEQDA HELITAANKA KOBCINTA, XUQUUQDA, IYO SINAANTA (FARE)

WAA MAXAY DEEQDA FARE?

Waaxda Shaqada ee Gobolka New York (New York State Department of Labor, NYS DOL) waxay deeq ka heshay Xafiiska Haweenka ee Waaxda Shaqada ee Mareykanka si ay u qabato wacyi-gelin iyo bandhigyo loogu talagalay haweenka oo diiradda lagu saarayo xuquuqda iyo dheefaha shaqada. Waxaan hiigsaneynaa inaan gaarno haweenka la haybsooco iyo kuwa aan mataalada helin ee ka baxsan magaalada New York, gaar ahaan kuwa kunool meelaha miyiga ah, iyada oo loo marayo bandhigyo iyo dhacdooyin qof ahaan iyo muuqaal ah. Hadafkeenu waa inaan faafino waxbarashada iyo aqoonta si loo xoojiyo haweenka gobolka oo dhan, taas badelkeedana, inaan ka caawino haweenka inay noqdaan xudunta xuquuqda iyo faa'iidooyinka bulshooyinkooda.

SIDEE U CODSADAA SOOJEEDIN?

La xariir NYSDOL adoo kala xariiraya iimaylkaan **info.nysdol@labor.ny.gov** ama wac **888-4-NYSDOL (888-469-7365)**.

MAWDUUCYADA AWOODA LA SAARAAYO

MUSHAARKA UGU YAR

Dhammaan shaqaalaha Gobolka New York (NYS) waxay xaq u leeyihiin inay helaan ugu yaraan mushaarka ugu yar ee saacadlaha ah.

GOOBTA	MUSHAARKA UGU YAR *maanta oo ay taariikhdu tahay 12/31/2022*	
Magaalada New York, Degmada Long Island iyo Westchester County	$15.00/saac	$17.00/saac Adeegyada Caawimaada Daryeelka Guriga
In kale Gobalka New York	$14.20/saac	$16.20/saac Adeegyada Caawimaada Daryeelka Guriga
Cuntooyinka Fudud - Dalka oo dhan	$15.00/saac	

MUSHAARKA UGU YAR EE SHAQAALAHA HELA LACAGTA DULSAARKA AH

Sharciga NYS wuxuu u oggolaanayaa shirkadaha kamid ah inta badan waaxaha shaqada inay bixiyaan mushaarka ugu yar oo qanaaco leh iyagoo isku daraya mushaarka uu bixiyo shirkada iyo lacagta dulsaarka ah uu shaqaaluhu ka helo macaamiisha. Kaliya shirkadaha ka shaqeeya waaxaha soodhaweynta ayaa loo ogol yahay inay ka helaan dhibco ah lacago dulsaar ah mushaarka ugu yar. Shaqooyinka bixiya lacagaha dulsaarka ah oo kaliya waa mamnuuc.

GOOBTA	ADEEGGA SHAQAALAHA	SHAQAALAHA ADEEGGA CUNTADA
Magaalada New York, Degmada Long Island iyo Westchester County	$12.50 Mushaar $2.50 Dhibcanaha Dulsaarka	$10.00 Mushaar $5.00 Dhibcanaha Dulsaarka
In kale Gobalka New York	$11.85 Mushaar $2.35 Dhibcanaha Dulsaarka	$9.45 Mushaar $4.75 Dhibcanaha Dulsaarka

SHAQEYNTA WAQTI DHEERAAD AH

Inta badan shaqaalaha waa in lacag lagu siiyo waqtiga dheeraadka ah ee ay shaqeeyaan kadib marka ay shaqeeyaan 40 saacadood asbuucii. Lacagta lagu bixiyo waqtiga dheeraad ah waa 1½ jeer mushaarka aad caadi u qaadato. Shaqaalaha hela lacagaha dulsaarka ah, shirkaduhu waa inay siiyaan lacagaha waqtiga dheeraadka ah oo ah 1½ qiimaha mushaarka ugu yar, oo kayar dhibcaha lacagta dulsaarka ah. Shaqaalaha beeraleyda ee waqti xaadirkaan hela lacagta waqtiga dheeraadka ah ka dib marka ay shaqeeyaan 60 saacadood asbuucii shaqada iyo saacad kasta oo ay shaqeeyaan maalinta nasashada ee loo qoondeeyey.

KALA SAARIDA SHAQAALAHA: SHAQAALE AMA QANDARAASLE MADAX BANAAN?

Si loo go'aamiyo in shaqaalaha loo aqoonsado inuu yahay shaqaale ama qandaraasle madax bannaan, waa in la tixgeliyo xiriirka ka dhaxeeya shaqaalaha-shirkada uu u shaqeynaayo. Qandaraaslayaasha madaxa banaan waxay sameeyaan ganacsi u gaar ah waxayna adeegyada siiyaan dadwaynaha guud.

Qandaraaslaha madaxa banaan wuxuu shaqadiisa qabtaa asagoon uusan wehlin:

- Kormeere
- Tilmaan
- Xakameyn

Taas badelkeeda, xiriirka shaqaalaha-shirkada ayaa jiri kara haddii shirkada:

- Doorato goorta, goobta, iyo sida shaqaaluhu u fuliyo adeegyada
- Bixiyo adeegyo, qalab, aalado, iyo sahay
- Si toos ah ula socoto shaqada
- Dejiso saacadaha shaqada iyo qiimaha lacagta la bixinaayo, iwm

Halkaan ka baro xog badan: **dol.ny.gov/independent-contractors**

Marka shirkad si ula kac ah si khaldan shaqaalaha u aqoonsato inuu yahay qandaraasle madax banaan, waa khiyaano arrintaas. Qaar kamid ah shirkadaha waxay adeegsadaan xeeladaan si ay oga fogaadaan u hoggaansanaanta Caymiska Shaqo la'aanta, Magdhowga Shaqaalaha, Badqabka Bulshada, canshuur celinta, iyo mushaarka ugu yar. Khiyaarada usoo gudbi NYS DOL adoo isticmaalaya barta oonleenka ah **dol.ny.gov/report-fraud** ama wac khadka khiyaarada ee 24-ta saac: **866-435-1499**.

BARO XUQUUQAHAAGA KA SHAQAALE DUMAR AH AHAAN OO KATIRSAN NYS

SHARCIGA MAMNUUCIDA TAARIIKHDA MUSHAARKA

Laga bilaabo Janaayo 6, 2020, shirkadu waxay waydiin kartaa qofka shaqada codsanaaya filashooyinka mushaarkiisa, laakiin ma codsan karto ama ma isticmaali karto mushaarka codsadaha iyo taariikhda dheefaha si ay u go'aamiso inay wareysato ama inay siiso shaqo.

OGEYSIISYADA LACAG BIXINTA

Marka lagu shaqaaleysiiyo, shirkadu waa inay kusiiso ogeysiiska mushaarka oo ku qoran xog muhiim ah; sida:

- Cadadka lacagta iyo inta jeer ee mushaarka lagu siin doono
- Cadadka mushaarka ee maalinlaha ah, iyo
- Lacag kasta oo laga jaraayo mushaarkaaga

SINAANTA MUSHAARKA

Waa sharci daro in shirkadu siiso dumarka mushaar ka yar kan raga la siiyo haddii ay qabanayaan isku shaqo ayadoo ku saleynaysa jinsiga. Kaladuwanaanshaha mushaarka waxaa lagu saleyn karaa waayo aragnimada shaqaalaha, shahaadooyinka, ama arrimo kale oo aan la xariirin jinsiga, sida waxbarashada ama khibrada qofku leeyahay.

MUSHAARKA IYO LACAGAHA LAGA JARO

Waa inaad hesho mushaarka dhammaan saacadaha aad shaqeysay. Waad heli kartaa lacag kaash ah ama jeeg, laakiin waa qasab in lagu siiyo lacag bixin faahfaahsan mar kasta oo mushaarka lagu siinaayo.

Shirkadu lacag kaagama qaadi karto:

- Wax aad jabisay
- Wax aad qastay
- Wax aad waxyeelaysay
- Kharashaadka unifoomka iyo dayactirka
- Kharashaadka shirkada Ganacsiga, ama
- Kaash yarida

HELIDA LUUQADA

Wakaaladaha gobolka ee bixiya adeegyada dadwaynaha ee tooska ah waxaa looga baahan yahay inay bixiyaan adeegyo tarjumaad oo bilaash ah oo ay siiyaan xubnaha dadwaynaha si loogu adeegsado foomamka iyo tilmaamaha muhiimka ah. Adeegyada turjumaada waxaa lagu bixiyaa in ka badan 200 oo luuqadood, oo ay ku jirto luuqada dhegoolayaasha. NYS DOL, dukumiinti qoran oo muhiim ah ayaa lagu turjumay 12 luuqadood ee ugu sareeya gobolka.

XADGUDUBKA GALMADA EE KA DHACA GOOBTA SHAQADA

Dhammaan shirkadaha NYS waxaa looga baahan yahay inay bixiyaan goob shaqo oo ka madax banaan xadgudubka galmada. Shirkadu waa inay leeyihiin siyaasad kahortagga xadgudubka galmada, waana inay siiyaan tababar sannadle ah shaqaalaha, siyaasad qoraal ah oo ka hortagaysa xadgudubka galmada ee ka dhanka ah dhammaan shaqaalaha.

ILMO NAAS KU SIINTA GOOBTA SHAQADA

Ilaa saddex (3) sano kadib dhalmada, hooyooyinka naaska nuujiya waxay xaq u leeyihiin inay qaataan nasasho macquul ah oo aan mushaar lahayn ama inay isticmaalaan dhibcaha waqtiga nasashada ama waqtiga cuntada maalin kasta, si ay caanaha naaska oga lisaan marka ay joogaan shaqada. Sharci cusub ayaa dhaqan galaya bisha Juun 2023 wuxuuna balaarinayaa hoyga hooyada naaska ku nuujineysa ilmaha goobta shaqada ee NYS wuxuuna dhigayaa in dhammaan shurkadaha inay bixiyaan meel ku haboon, oo naaska lagu liso karo marka la joogo goobta shaqada, biyo socda, iyo koronto. Sharciga cusub waxa kale oo uu uga baahan yahay shirkadaha inay horumariyaan oo ay fuliyaan siyaasad qoraal ah oo ku saabsan xuquuqda shaqaalaha ee ku saabsan lisida caanaha naaska marka hooyadu joogto goobta shaqada.

FASAXA XANUUNKA IYO BADQABKA EE LAGU HELO MUSHAARKA EE NYS

Shaqaalaha qaybta gaarka ah ee NYS waxay hoos yimaadaan sharciga Fasaxa xanuunka iyo Badqabka ee Lagu helo Mushaarka. Ugu yaraan, shaqaaluhu waxay helaan hal (1) saacadood oo ay ku helaan fasaxa xanuunka 30 kii saacadood oo ay shaqeeyaanba. In fasaxa lagu bixiyo mushaar ama inaan lagu bixin waxay ku xiran tahay heerka shirkada.

CAYMISKA SHAQO LA'AANTA

Haddii aad kasoo shaqeysay NYS aadna shaqadaada waydo adiga oo aan qalad sameyn, waxaa laga yaabaa inaad u qalanto Caymiska Shaqo la'aanta. Waa inaad heshaa dakhli kugu filan si aad u sameyso cabasho; waa inaad diyaar u tahay, aadna rajeynayso, aadna awoodo inaad shaqeyso; waa inaad si joogto ah u raadiso shaqo; aadna qorto dadaalada aad ku raadineyso shaqada. Bartaan oonleenka ah ka codso **dol.ny.gov/** ama wac **888-209-8124**.

SIDEE USOO GUDBIYAA CABASHO?

Waaxda Heerarka Shaqaalaha waxay caawisaa xallinta jebinta sharciga shaqada ee NYS. Waa sharci daro in shirkadu saarto, ganaaxdo, ama sinaba u takoorto ama uga aargoosato shaqaalaha haddii ay sameeyaan cabasho ku saabsan xadgudubka sharciga shaqada ee suurtagalka ah ama uu adeegsado xuquuq kasta oo lagu ilaaliyo sharciga shaqada ee NYS.

Soo gudbi foomka **LS223** si aad u buuxiso cabasho. La xariir Waaxda Heerarka Shaqaalaha si aad u hesho xog dheeraad ah: **888-52-LABOR (888-525-2267)** ama **LSAsk@labor.ny.gov**.

Si aad u hesho xog dheeraad ah, fadlan booqo **dol.ny.gov/fostering-access-rights-and-equity-fare-grant**

Waaxda Shaqada ee Gobolka New York waa Barnaamij/Shirkad bixiyo Fursado Loo Siman Yahay.
Caawinta iyo adeegyo ayaa loo heli karaa kadib marka la codsado waxaana si bilaash ah ku heli kara shaqsiyaadka naafada ah TTY/TDD 711 ama 1-800-662-1220 (Ingiriis) / 1-877-662-4886.
P22SM (12/22)
Deeqda FARE waxa lagu maalgeliyay deeq federaal ah oo dhan $350,000, taasoo ka kooban 100% miisaaniyadeeda. 0%, ama $0 waxaa maalgeliyay gobalka iyo ilaha aan dawliga ahayn.